

Markii wadahadal ku salaysan fiidiyow aad la yeelanayso xarumaha daryeel-caafimaadeedka iyo bukaanada waa inaad ka fekerta

In khadka internet u si fiican u shaqaynayo oona cillad usan lahayn markii kulanka fiidiyow aad yeelanayso.

Hubsasho iyo in wax cillad aysan jirin awgood, waa in khadka internetka aad ka shaqaysiiyaa kahor inta wadahadal ku salaysan fiidiyow usan bilaaban.

Tan kale hubso in xaaladda agagaarkaada ay degan tahay oon aysan jirin wax buuq ah, iyo in qofka aad la hadlayso u ku arki karo. Ka feker in kaamerada iyo indhahaaha ay yihiin isku heer. Xaaladaas dadyoowga aad la hadlayso waxaa suuraggal u noqonaayo in si toos ah ee xagga hore indhaha in ay kugu arki karaan.

Markii aad isticmaalayso wadahadal ku salaysan fiidiyow waa inaad ku sugan tahay bay`ad aan buuq lahayn. Tani waxay maslaxad ugu jirta adiga iyo qofka aad wadahadalka la yeelanayso iyo inaad is-maqashaan. Sidoo kale, waa qaab lagu sugo xajinta sirta xirfadda.

Sidii aad sare ugu qaado tayada codka awgiis, waxaad adeegsata qalabka/samaacadaha dhegaha la gashado.

Haddii aad isticmaalayso mobaylkaaga ama tabletkaaga waa in nuuxnuuxsashada ka ilaalisaa. Markii wadahadalka u socdo haddii aad dhaqdhaqaaqdo waxaa hoos u dhici doono tayada masawirka/fiidiyowga.

Ha iloowin inaad kaydsato farinta emailka ee laga soo diray rugta daryeel-caafimaadeedka aad ka tirsan tahay. Farinta emailka waxaa ku qoran isku-xireha aad adeegsan doonto wadahadal ku salaysan fiidiyow awgiis.


Adigoo isticmaalayo mobayl ama tablet isku-xir madasha wadahalal ku salaysan fiidiyow

Wadahadalka ku salaysan fiidiyow kahor waa inaad isku diyaarisa, adigoo marka hore fura barnaamijka [**Skype för företag**], kaasoo taleefanka ama tabletka kugu duuban (waa inaad guda-gasha barnaamijka "app").

Rugta daryeel-caafimaadeedka ee aad ka tirsan tahay, waxay ku soo dirtay farin email ku qoran isku-xire [länk], kaasoo ku suuraggelin doono ka qaybgelida wadahadalka. Fur farinta emailka kaddib jag-sii isku-xireha [Anslut till Skype-mötet].

Kaddib barnaamijka ayaa ku soo ifbaxayo, (mararka qaarkood waxaa ku soo ifbixin doono farin ku qoran [*Sidan öppnas i en annan app*], sida aad u furto darteed waxaad jag-siisa "öppna") kaddib marti "gäst" ahaan isku-xir (haddii taasi aynan ku soo ifbixin, xir barnaamijka kaddib koow ka soo bilaaw), ku qor magacaaga kaddib fallaarta jag-sii. Markaas kaddib waxaad ku guda-jirta gudaha waxaana sugaysa qofkii kulan aad la yeelan lahayd. Waxaad jag-siisaa kaamerada iyo mikrofoonka, waa haddii aynan daarnayn.

Soo gabagabeey wadahadalka adigoo jag-siiyo gacanta taleefanka ee midabka gaduudan leh.



Isku-xir kombyuutar iyo wadahalal ku salaysan fiidiyow

Rugta daryeel-caafimaadeedka ee aad ka tirsan tahay, waxay ku soo dirtay farin email ku qoran isku-xire [länk], kaasoo ku suuraggelin doono ka qaybgelida wadahalalka. Fur farinta emailka kaddib jag-sii isku-xireha [Anslut till Skype-mötet].

Kaddib waxaa ku soo ifbixi doono khaanad cusub, kaddib waxaa laga codsanayaa in isku-xirida awgeed aad adeegsato barnaamijka [Skype mötesapp].

Kaddib waxaa ku soo ifbaxayo dariishad, halkaas ku qor magacaaga kaddib jag-sii [anslut].

Waxaad jag-siisaa kaameraada (haddii kombyuutarkaaga usan lahayn kaamera, waa inaad kombyuutarka ku rakibta kaamera) iyo mikrofoon waa haddii aynan daarnayn. Kaddib sug qofka kulanka kula yeelan doono.

Soo gabagabeey wadahalalka adigoo jag-siiyo gacanta taleefanka ee midabka gaduudan leh.

